# **Xeerka** Bulshada Dugsiga

**Collaborative. Respectful. Communication.**

**Isgaarsiin. Xushmad badan. Iskaashi.**

Xeerka Bulshada Dugsiga ee soo socda wuxuu dul marayaa masuuliyada waalidiinta, xannaaneeyayaasha, barayaasha iyo shaqaalaha dugsiyada dadweynaha ee NSW si loo hubiyo in jawigeena waxbarasho ay yihiin kuwoleh iskaashi, is taageerid leh iyo isku xirnaan.

Waxaan isula dhaqanaa si xushmad leh

Waxaan mudnaanta kala siinaa fiyoobaanta dhammaan ardeyda iyo shaqaalaha.

**Dabeecada aan ammaanka** lagama aqbalo dugsiyadeena.

Wadajir ayaan ula shaqeynaa dugsiga

## Waxa dugsiyadeenu ay bixiyaan

Dugsiyada dadweynaha ee NSW way shaqeeyaan si ay ugu abuuraan jewi wanaagsan ardeyda, shaqaalaha iyo bulshada dugsiga oo dhan ee taageera waxbarashada ardeyga. Waxaan ku da'daalnaa si aan u hubino in ardey kasta la ogaado, la qiimeeyo oo la daryeelo.

Waxbarashada ugu fiican waxay dhacdaa marka waalidiinta iyo dugsiyadu wada shaqeeyaan.

Xeerka Bulshada Dugsigu wuxuu is xejiyaa Qorshaha Istiraatijiyada 2018 -2022 ee NSW Department of Education.



## Degaanno wanaagsan

Waa muhiim in dugsiyadeena dadweynaha ee NSW ay leeyihiin bay'ad wanaagsan oo ay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha lagu wargeliyo horumarka ardeyda iyo baaqyada dugsiga.

Waalidiinta iyo xannaaneeyayaashu waxay fili karaan:

- in lagugu soo dhaweeyo dugsigeena oo aad si shuraako ah ula shaqeysid si kor loogu qaado waxbarashada ardeyga.
- xiriirka shaqaalaha dugsigu wuxuu noqonayaa mid wakhtiyeysan, edeb leh oo wargal ah.
- xiriirada aqooneed ee lala yeesho shaqaalaha dugsiga waxay ku saleysan yihiin hufnaanta, daacadnimada iyo xushmada labada dhinac ah.
- in si caddaalad ah laguula dhaqmo. U dulqaadashada iyo isfahamka ayaa kor loo qaadaa maadaama aan xushmeyno kala duwanaanta.

**Hubinta jewi degaanno waxbarasho oo u xushmad badan dhammaan xubnaha jaaliyadaha dugsiyada dadweynaha ee NSW.**




Waxaan abuurnaabay'ado waxbarasho oo iskaashi leh

Dhammaanteen waxaan ka ciyaarnaa qayb

Waxaan u shaqeynaa shirko ahaan si aan u horumarino waxbarashada ardeyga

## La xiriirida dugsiyada kale



Shaqaalaheenu wuxuu heli doonaa wakhti uu kugula hadlo markay ku siin karaan dareenkooda oo buuxa. Fadlan xasuuso taas marka shaqaalaheenu ay ku jiraan fasal ama ay hawlo kale maareeynayaan, waxaa laga yaabaa inaan la heli karin wakhti ay uga jawaabaan su'aalahaaga isla markiiba.

Dugsiyadeena iyo jaaliyadaheena waxay hubin doonaan in xiriirka qoraalka ahi uu yahay wax haboon, caddaalad ah oo ay sahlan tahay in la akhriyo. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad isticmaashid iimeyl iyo isgaarsiinta bulshada si haboon si aad ugu xirnaanto dugsigaaga oo aad la socoto munaasabadaha soo socda ee bulshada dugsiga dhexdeeda.

Tusaheena loogu talagalay waalidiinta, xannaaneeyayaasha iyo ardeyda wuxuu bixiyaa macluumaad faa'iido leh oo ku saabsan nidaamka cabashooyinka: https://education.nsw.gov.au/about-us/rights-and-accountability/complaints-compliments-and-suggestions/guide-for-parents-carers-and-students



## Isla xiriirida xushmada lehi ayaa sax ah

Dhammaan goobaha shaqada dadku waxay xaq u leeyihiin inay dareemaan in la xushmeeyey. Dabeecada xun ee aan la aqbali karin kuma laha wax boos ah bulshada dugsigeena dhexdeeda.

Si loo hubiyo fiyoobaanta ardeyda, shaqaalaha iyo bulshada dugsiyadeena, waxaa la qaadi doonaa talaabooyin wax lagaga qabto dabeecada aan la aqbali karin. Tan waxaa laga yaabaa inay ku jiraan xadidida la xiriirka bulshada ama kiisaska aadka u sii daran, u gudbinta Boliiska NSW.



## Dabeecada aan la aqbali karin waxaa laga yaabaa inay ka mid yihiin laakiinse aysan ku koobneyn:

- Ficilada cabsi gelinta leh ama dagaalka, sida qalalaasaha, baaqyada hanjabaadaha ama jir ahaan inta laysu jirsado.
- Luuqada cabsi gelinta leh ama dagaalka, oo ay ku jirto isticmaalka waxyaalaha aan habooneyn, sameynta hadalo ku saabsan dumarnimo, midab kala sooc ama faallo cey ah ama isticmaalida cod xun.
- Ula dhaqmida xubnaha bulshada dugsiga si ka duwan sababa la xiriira xaalkooda diimeed ama iintooda.
- Xiriirka aan habooneyn oo wakhti lumiska ah.

**Isgaarsiin. Xushmad badan. Iskaashi.**